

## Filimka cimiladda >

### La qabsiga cimiladda South Africa

Isbeddela cimiladda waxay saamayn ku yeelan doonaan dadka, bulshadda iyo nidaamka deegaanka adduunkoo dhan. Inta badan ay wax ka soo gaadhaan waa gobolada jogoodu hooseeyo, bulshooyinka jasiiraddaha, Cidhifka waqooyi ee adduunka iyo gobbolada abaartu ku dhacday ee gudaha Africa. Goobahan inta badan waa dadka faqiirka ah kuwa aadka ugu nuguli. Degmadda eThikwini ee South Africa waxay dhammaystirtay mashruuc dhammaystira oo la qabsiga cimiladda ah kaas oo isla mar ahaantaa kor u qaadaya heerka nolosha ee dad waynaha. Kani waa mid ka mid ah tusaalooyinka la qabsiga cimiladda ee laga dhisay adduunka kaas oo aynu wax badan ka baran karno.

#### Waajibaadka la buuxinayo ka hor inta aanad daawan filimka

1. Sidee ayaad u malaynaysaa in isbeddelada cimiladdu ay u saamayn karaan gobolada abaartu ku dhacday sida Africa?
2. Sababtee ayaad ugu malaynaysaa in dadka faqiirka ahi ay aad ugu sii nugul yihiin isbeddelada cimiladda dadka qaniga ah ?

#### Waajibaadyada la xidhiidha filimka


1. Sharax sababta Degmadda Ethekwini ee South Arfica ay u tahay aaga gaar ahaan u bandhigan cimiladda?
2. Diyaari muuqaalka guud ee mashruuca ee Degmadda eThekwini ay hirgelisay si ay sugto in bulshaddu si wanaagsan ula qabsato cimiladda.
3. Labbadaba aqoonta iyo dhaqaalaha aad ayay muhiim ugu yihiin kor u qaadida heerka nolosha ee dad waynaha. Tallaabooyinkee muuqada ayaa keenay horumarinta heerka nolosha ee dad wayanaha degen Buffelsdraai?
4. Sababtee ayay muhiim u tahay in laga beero kaymo cusub gudaha Buffelsdraai?
5. Sababtee ayay muhiim u tahay in laga saaro noocyda dhirta ajnabiga ah gudaha Durban?
6. Sababtee ayaa wax soo saarka dhuxusha ka samaysan dhuxul iyo loox la gubay uu u yahay mashruuc kaas oo keenta labbada la qabsiga cimilada iyo horumarinta cammuuda ?
7. Waa maxay khasaaraaha saqafyada aqalada cagaaran?

#### Waajibaadyada la si xoojiiyay

1. Ma u malaynaysaa in mashaariicda laga hirgeliyay Buffelsdraai, waxaa loo gudbin karaa qaybaha kale ee adduunka? Xaqiji

jawaabtaada.

2. Halista isbeddelada cimiladda gudaha wadanka ama gobolka waxay dhacdaa meesha asbaabuhu ay isku dul rasaysmaan. Halista: Intee in leeg aay cimiladdu isbeddeli, oo kuwee shilalka xad dhaafka ah ayaa aynu qaabilli doonaa? Waxyeelo gaadhida: Waa maaxay ilaa xadka waxyeelo gaadhsinta khataraха gobolka/aagga? Nuglaannshaha: Sidee ayay dadku ugu nugul yihin kuwaas oo ku nool isbeddelada cimilda?



Sawirka:: Guddida Cimiladda ee Qaramadda Middoobay io Wakaalada Deegaanka Norway  
Halista/Halista cimiladda la xidhiidha/Nuglaanshaha/Waxyeelo soo gaadhida

- a) Si kooban u sharax sida aad u malaynayso asbaabaha halista, nuglaanshaha iyo waxyeelo gaadhida ku dabaqan Buffelsdraai ee gudaha South Africa, iyo Kvam iyo Oslo gudaha Norway. Xoriyad dareen aad ugu isticmaasho jadwalka la mid ah ka hoos ku

muujisan jawaabahaaga. Haddii aad u baahantahay macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida ay ugu soo bandhigmeen Kvam iyo Oslo isbeddelka cimiladda, markaas daawo filimka "Klimatilpassing i Noreg" ("La qabsiga Cimilada Norway").

	Halis	Waxyeelo gaadhida	Nuglaanshaha
Buffelsdraai			
Kvam in Gudbrandsdalen			
Oslo			

- b) Maxaad u malaynaysaa in uu yahay faraqa wayne e u dhxeeyaa Oslo iyo Kvam ee ku saabsan halista isbeddelada cimiladda?
- c) Maxaad u malaynaysaa in uu yahay faraqa wayne e u dhxeeyaa Buffelsdraai iyo Kvam ee ku saabsan halista isbeddelada cimiladda?